



# Hubinta goobaha amaanka ee diinta

## **Ka hortaga dhibka loo geysanayo dadka diinta aaminsan sababtuna tahay xaqiiqda ama suurtagal nimada nooca galmo ama aqoonsiga jinsi**

Ka hadlida nooca galmo iyo aqoonsiga jinsiga waxay noqon karaan kuwo ku adag bulshooyinka diinta aaminsan. Laakiinse marka dadka khaniiska ah, jinsiga bedeshay ama jinsiga kala duwan ma dareemayaan in bulshooyinka diinta aaminsan inay taageerayaan, daraasad baaritaan ah ayaa noo sheegaysa in laga yaabo inay la kulmaan dhib weyn.

2022 dhexdiisa, sharci cusub ayaa Victoria ka dhaqangalay – *hababka kontoroolka iyo bedelka (Bedelaada) Xeerka 2021 ee Mamnuucida Falal sameynta* - oo joojinaya iskudayga in la bedelo ama la kontoroolo nooca rabitaan ee gofka galmadiisa ama aqoonsiga jinsi. Aqoonsiga khaniiska/khaniisada, jinsiga bedelashada iyo dadka jinsiga kala duwan waa u muhiim caafimaadkooda iyo fayoqabkooda.

### **Waa maxay hababka kontoroolka ama bedelka?**

Marmarka qaarkood oo la yiraahdo, daaweynta bedelaada, hababka bedelka ama kontoroolka waa wax qabadyo iskudaya inay bedelaan ama qariyaan shakhsiga noociisa galmo ama aqoonsiga jinsi. Hababkan waxaa ku jiri kara:

- waxbarida
- waxqabadka daryeelka diimeed
- la talinta
- kala soo dhexgelida caafimaad ama cilmi nafsiiyeed ee kale.

Hababkani waxay uu ku saleysan yihiin sheekashada dhibka badan ee beenta ah kuna saleysan inay jiraan wax khaldan ama jaban oo ku saabsan dadka khaniisiinta, jinsiga bedeshada ama jinsiga kala duwan.

Waxaa jirta caddeyn in hababkani ay keenaan dhib weyn, waxyeelo socota, arimo caafimaad oo wakhti dheer waxaana laga yaabaa inay kordhiyaan khatarta isdilka.

### **Hababkeebaa sharciga ka soo horjeeda?**

Laga soo bilaabo Febaraayo 2022, hababka kontoroolka ama bedelaada waa laga mamnuucay Victoria. Sharcigu wuxuu u qeexayaa hababka bedelka ama kontoroolka sidan:



Sida waafaqasan sharciga, hababka kontoroolka ama bedelka ee sababa dhaawaca ama dhaawac daran waxaa laga yaabaa inay noqdaan fal dembiyeed. Tan waxaa ka mid ah:

- Hababka sababa dhaawac jireed ama dhaawaca caafimaadka maskaxada, haddii uu yahay mid joogta ah ama ku meel gaar ah
- Hababka sababa dhaawac dara – dhaawac khatar geliya nolosha ama weyn oo dheerada
- Uga saarida qof Victoria bannaankeeda si loogu soo sameeyo habab dhaawac sababaya
- Xayeysiinta habka bedelka ama kontoroolka.

Xitaa haddii qof weydiisto in laga caawiyo inuu bedelo ama kontoroolo nooca galmada ama aqoonsiga jinsi, waa wax sharciga ka soo horjeeda in la qabtaa hababkaan ama loo gudbiyo qof sameyn doona.

### **Xirfadlayaasha cilmi nafsiga iyo daawada**

Xirfadlayaasha caafimaadku waa inay sii wadaan inay bixiyaan daaweynta cilmi nafsiyeed iyo daawada ee waafaqsan heerarka xirfadeed. Tan waxaa ku jira u gudbinta qof daaweynta cilmi nafsiyeed ama daawada taageeraysa ee lagama maarmaanka ah. Xirfadlayaasha caawimaad ee ku guuldareysta inay tan raacaan waxaa laga yaabaa inay jebiyeen sharciga.

*Sharcigani waxaa loogu talagalay inuu hubiyo in dhammaan dadku inay ku dhaqmaan diintooda ilaa inta aaney sameyn hababka kontoroolka ama bedelka.*

### **Waa maxay Sinnaanta Fursada ee Victoria iyo Doorqa Guddiga Xuquuqda Bani'aadanimo?**

Goluhu wuxuu awoodaa:

- helida warbixinada hababka bedelka ama kontoroolka waxayna raadiyaan natiijo, oo ay ku jirto u gudbinta ha'yad kale.
- baar hababka bedelka ama kontoroolka ee u muuqda inay daran yihiin, kuwo guud ama joogta ah
- oo bixinaysa waxbarasho wajahaysa ha'yadaha diinta, kuwa caafimaadka bixiya iyo dadka diinta leh.

### **Sidii loo soo sheegi lahaa hababka kontoroolka ama bedelka**

Haddii ay ku soo martay ama aad markhaati ka ahayd hababka kontoroolka ama bedelka adiga ( ama wakiilka aad magacowday) ayaa u soo sheegi kara Fursadaha Siman ee Victoria iyo Guddiga Xuquuqda Bani'aadamka.

**Taleefan** 1300 292 153

**Turjumaan** 1300 152 494

**limeyl** [enquiries@veohrc.vic.gov.au](mailto:enquiries@veohrc.vic.gov.au)

**Online** [humanrights.vic.gov.au/get-help/](http://humanrights.vic.gov.au/get-help/)

### **Caawimaad iyo taageero**

Albaabka Qaanso roobaadka ah wuxuu bixiyaa macluumaad takhasus LGBTIQ, taageero, iyo adeegyo u sii gudbin ah.

**Taleefan** 1800 729 367

**SMS** 0480 017 246

**limeyl** [support@rainbowdoor.org.au](mailto:support@rainbowdoor.org.au)

### **Wixii ilo macluumaad dheeraad ah**

**Oo ku saabsan hababka kontoroolka ama bedelka (Bedelaada) Xeerka Mamnuucida Hababka**

[humanrights.vic.gov.au/change-or-suppression-practices/about-the-csp-act/](http://humanrights.vic.gov.au/change-or-suppression-practices/about-the-csp-act/)

**Golaha Dhaqamada badan ee GLBTIQ Australia - ha'yada ugu sareysa ee dhaqamada badan iyo diimaha faraha badan ee shakhsiyaadka iyo kooxaha bulshada ee LGBTIQ**

[agmc.org.au](http://agmc.org.au)